



Tetralogy of Fallot Repair

Hagaajinta Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya



Ogeysiis:

Wadne Caadi ah



The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Hagaajinta Tetralogy of Fallot (Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya) (TOF) Repair of Tetralogy of Fallot (TOF)

Qalliinka lagu hagaajinayo cilladda dhiigga Wadnaha waa xiritaanka ventricular septal defect (cilladda duleelka wadnaha ama VSD) iyo in laga saaro waxa xannibaya qulqulka dhiigga aadaya sambabada. Marka uu jiro TOF, waxaa ciriir noqon kara daboolka hoose ee sambabka (dhuubashada daboolka hoostiisa) oo sababtu tahay muruqa qalbaca midig oo ballaaranaya, daboolka sambabka iyaduna waxa ay noqon kartaa mid yar (dhuubashada daboolka), ama meesha ka sarreysa daboolka sambabka ayaa noqon karta mid yar (dhuubashada daboolka dushiisa). Dhuubashada daboolka dushiisawaxaa lagula tacaali karaa dibugoynta muruqa qalbaca hoose ee weynaaday ama sharooto. Marka lagu daro dhuubashada daboolka, sharooto ayaa lagu dhejinayaa halbowlaha ugu weyn sambabka ilaa qalbaca midig ee daboolka sambabka, oo waxaa la yiraahdaa “sharootada weyneynta qalbaca midige.” Haddii uu ciriirku ku egyahay dhuubashada daboolka dushiisa, sharooto ayaa lagu weyneyn karaa ciriirka halbowlaha ugu weyn sambabka. Hagaajinta TOF waxaa badanaa ilmaha lagu sameeyaa markay jiraan 3 ilaa 9 bilood.

Marka aysan jirin TOF/dabool ka maqan sambabka, sida magaca ka muuqata, bukaanka waxaa ka maqan daboolka sambabka. Qulqulkaka dhiigga sambabka oo aan xaddeysneyn awgiis, halbowleyaasha sambabka weynaanaya. Haddii ay weyn yihiin oo ay cadaadinayaan hawamareenka ilmaha, waxay noqoneysaa in la qalo xilliga dhallaanimada. Xilliga qalliinka ah hagaajinta cilladda wadnaha ah ee lagu dhasho, marinka right ventricle to pulmonary artery conduit (qalbaca midig ilaa halbowlaha sambabka ama RV-PA) ayaa lagu beddelayaa daboolka. Waxaa jira waxyaabo badan oo loo isticmaalo marinka RV-PA. Waxa ay ku xiran tahay qorshaha qalliinka iyo qaabka, marinnada waxaa laga sameynaya Gore-tex®(Gore), wax laga soo gooyo jirka ilmaha (wax laga keenay noole ah aadane), Marinnada Contegra® (Medtronic) (xididka (sac) muruqa xawlmariidka), ama marinnada Hancock® (Medtronic)(tuubada Dacron oo u eg qaansiir (doofaar) muruqiis) ayaa la isticmaali karaa.

Qalliinka inta uu socdo, fursita bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Waxaa ilmaha yar lagu xirayaa wadne iyo sambab macma ah (mashiin ah wadne—sambab). Qeybta midig kore ayaa la furayaa oo qalbaca midig ee muruqiisu bararay ayaa laga soo saarayaa daboolka saddex geesoodka ah ee fidsan. Sharootada Dacron® ayaa laga soo goynayaa cabbirka ku habboon oo lagu tolayo VSD. Daboolka muruqa fidsan ayaa la hubinayaa shaqadiisa, oo waa la tolayaa si looga hagaajiyo wixii daadasho ah. Haddii loo baahdo, halbowlaha sambabka ayaa la furayaa oo lagu shaqooteynayaa lo' (sac) xuub ah (kiish ku wareegsan wadnaha) ayaa laga goynayaa cabbir ku habboon. Marar badan, muruqa qalbaca midig ee bararay ayaa laga saarayaa iyadoo loo sii marayo daboolka sambabka haddii loo baahdo. Haddii lagu taliyo, xuubka lo'aad ayaa lagu tolayaa daboolka hoose, sharootada weyneynta, ama sharootada daboolka dushiisa.

Haddii ay jirin TOF/dabool ka maqan sambabka, waxaa jeexitaann lagu sameynayaa halbowlaha sambabka iyo qalbaca midige. Waxaa la soo xulayaa marin cabbir RV-PA sax ah oo ku habboon. Mid ka mid ah darafyadiisa waxaa lagu tolaa meesha laga jeexay halbowlaha sambabka oo kan kalena waxaa lagu tolayaa meesha laga jeexay ee qalbaca midig. Haddii ay halbowleyaasha sambabada midig iyo bidix ku filan yihiin in ay hawamareenka cadaadiyaan, waa in cabbirka laga yareeyo oo la saxo si aysan hawamareenku isugu uruurin.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 4 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Badanaa ilmaha waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (oo faleebbe laga qaato ama dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka dheecaanka looga daadinayo, iyo mararka qaarkood xargaha kala fogeynta batariga wadnaha oo meelgaar ah.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa 24 saac ilaa 48 saac ka dib qalliinka. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebbaha. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawada iyo dhiigga laga qaadayo faleebbaha ama IV. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya. Haddii la isticmaalayo, waxay ku xiran tahay nooca qulqulka dhiigga ee qorshaha qalliinka, oo ilmaha waxaa loo qorayaa Aspirin wakhti muddo ah qalliinka ka dib.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 6 maalmood ka dib hagaajinta cilladda wadnaha.

Hagaajinta Tetralogy of Fallot (Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya) (TOF)
Repair of Tetralogy of Fallot (TOF)

Qaashada Daawoyinka Guriga: Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib hagaajinta TOF sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortagi karo xinjirowga (haddii marin loo sameeyey
- Antibiyootigga bakteeriyada ilkaha ayaa loo qori karaa.